

How to Transfer a Cell Phone Number and Account to Your Name Sida Telfoonka Lambarka Gacanta iyo Koontada Magacaaga loogu soo Wareejiyo

If you are asking for an Order of Protection and the person you want protection from (the restrained person) has control or rights over your cell phone number and account and/or the cell phone number and account of your children in your care, you have the right to ask the judge to transfer those rights to you.

Haddii aad waydiisanayso Amarka Ilaalada iyo shaqsigaa aad doonayso in lagaa ilaaliyo (qofka lagaa reebayo) isagu kontoroolayo ama isagu haysto xuquuqda telfoon lambarkaaga iyo koontadaada iyo/ama lambarka telfoonka gacanta iyo koontada carruurtaada adigu aad daryeesho, waxaad xaq u leedahay in qaalliga aad waydiisado in xuquuqdan adiga lagugu soo wareejiyo.

Contact your wireless service provider (the company that provides your cell phone service) to understand if you can get (qualify to have) the account in your name. Ask what fees you will be responsible for. If the judge transfers the cell phone account to your name, you will be financially responsible and have to pay for all the costs and fees of your new account(s) with the wireless service provider.

Shirkadda telfoonkaaga gacanta la xiriir (Shirkadda bixisa adeegga telfoonka gacanta) si aad u fahamto haddii aad heli karto (aad u qalanto in aad hesho) in koontada magacaaga lagu soo qoro). Waydii lacagta adiga aad mas'uulka ka noqon doonto. Haddii qaalliga koontada telfoonka magacaaga uu ku soo wareejiyo, mas'uuliyadda lacagta telfoonka adiga ayay ku saarnaan doontaa oo adiga ayaa lagaa doonayaa in aad bixiso dhammaan wixii qarash ah ee soo raaca iyo lacagaha kale koontada (koontooyinka ee ay soo dalacaan shirkadda adeegga telfoonka gacanta bixisa).

To ask the judge to transfer the rights to the cell phone number (or numbers) and the account to you:

Si aad qaalliga aad u waydiisato si adiga lagugu soo wareejiyo xuquuqda telfoonka gacanta (ama lambarrada) iyo koontada:

1. Check item 18 on your *Petition for Order of Protection and Hearing* or check the appropriate box on your *Motion to Modify/Extend Order of Protection*. Make sure you check all the boxes that apply to your case. Read the form(s) carefully.

1. Calaamaddee lambarka 18 ee *Codsigaaga Amarka Ilaalada iyo Dhegeysiga* ama calaamaddee sanduuqa ku haboon ee *Codsigaaga Beddelka/Muddo ku darida Amarka Ilaalada*. Iska hubi in aad calaamadeyso dhammaan sanduuqyada adiga kiiskaaga quseeyo oo dhan. Foormka(foormamka) oo dhan si taxaddir leh isaga akhri.

2. If the judge signs your *Order of Protection*, see if the judge gave you the control and use of the phone and the account by ordering the transfer of the cell phone number and account to your name. Haddii qaalliga uu saxiixo *Amarka Ilaalada*, eeg haddii garsooraha uu ku siinayo kontoroolka iyo isticmaalka telfoonka iyo koontada isaga oo amraya telfoon lambarka iyo koontada in magacaaga lagu soo wareejiyo.

TO MAKE SURE YOU HAVE THE PAPERWORK YOU WILL NEED FOR THE WIRELESS SERVICE PROVIDER, FOLLOW THESE STEPS:

**ISKA HUBI IN AAD HAYSATO WARQADDAHA AAD U BAAHAN DOONTO EE LOOGA BAAHAN YAHAY
SHIRKADDA ADEEGGA TELFOONKA BIISA, RAAC TALLAABOYINKAN SOO SOCDA:**

- A. Get 2 copies of the signed *Order Transferring Wireless Phone Account* from the court clerk. Keep one copy for yourself in a safe place.
Hel 2 nuqdi oo ah *Amarka Wareejinta Koontada Telfoonka Gacanta* qaadiga maxkamadda ka qaado. Mid adiga dhigo meel ammaan ah.
- B. Fill out *Attachment to Order Transferring Wireless Phone Account* and make 1 copy. Read it carefully. It has instructions for you. Do NOT file this with the court or court clerk.
Warqadda la soo raaciyay buuxi si aad u dalbato Wareejinta Codsiga Koontiga Telfoonka Gacanta oo 1 nuqdi ka samayso. Si taxaddir u akhri. Tilmaamo ayaa adiga kugu qoran. Tan HA kula gudbin maxkamadda ama karaaniga maxkamadda.
- C. Send a copy of the filed *Order Transferring Wireless Phone Account* the *Attachment to Order Transferring Wireless Phone Account* to the wireless service provider. Go to <https://tnbear.tn.gov/Ecommerce/FilingSearch.aspx> to find out where to send the forms.
Nuqdi ah *Amarka Wareejinta Koontada Telfoonka Gacanta* IYO kan ku Lifaaqan *Amarka Wareejinta Koontada Telfoonka Gacanta* u dir shirkadda adeegga telfoonka gacanta bixisa booqo <https://tnbear.tn.gov/Ecommerce/FilingSearch.aspx> si aad u ogaato halka foormaka loo diro.
- D. The forms have instructions for the wireless service provider to transfer the cell phone account and number into your name. If you do not receive anything from the wireless service provider that the account has been put in your name within 2 weeks, you may want to contact the company yourself to check on the process.
Foormamka waxaa ku qoran tilmaamo loogu talalgay shirkadda telfoonka gacanta in koontada iyo telfoonka gacanta ay magacaanga ay ku wareejiyaan. Haddii shirkadda telfoonka gacanta aadan waxba ka helin oo koontada magacaaga aanan lagu qoran 2 toddobaad gudahooda, waxaa la doonayaa markaa in adiga nafsadaada ula xiriirto shiradda si aad u hubiso wareejinta halka ay marayso.